

**Dugsiga Dhexe ee Kellogg**  
**Kooxda Tala bixinta Naqshada**

**Filashooyinka La Xiriira Hab-dhaqanka Xubinta Guddiga**

- Samee dadaal kasta si aad uga qayb gasho kulan kasta, si aad u timaado waqtigii loogu talagalay, isla markaana aad isku diyaariso.
- Haddii aad ogtahay in aad maqnaanayso, hore ugu sii sheeg shaqaalaha taageerada guddiga.
- Meel la wada joogo ha ku dhaleecayn xubnaha ka tirsan guddiga, xubnaha shaqaalaha, xubnaha kale oo ka tirsan guddiga, ama muwaadin kasta oo kale. Warqadaha iyo e-mailada loo diro shaqaalaha degmada ama mas'uuliyiin la doortay waa dokumenti dadweyne.
- Hadal marka uu ku aqoonsado xiriiriyuhu. Ha soo dhexgalin ama ka ku lug yeelan wada sheekaysi marka xubin kale oo ka tirsan guddiga uu hadlayo.
- Hadalka soo koob oo ka hadal wax kulanka ku saabsan.
- Waxaad sheegtaa waxa aad u jeedo iyo macnaha waxa aad u jeedo; lama oggola khudbado siyaasadeed; ha ismuujin ama istustus ha samayn.
- Si cad u sharax sida aad u gaartay mawqifkaaga ku saabsan mawduuca laga hadlayo iyo sida uu ugu adeegayo danaha dadweynaha.
- La wadaag deeqsanimada. Fursadaha ballaari si aad u hesho aqoonsi wanaagsan.
- Taageer sharcnimada natijjooyinka guddiga, xataa kuwa aanad ku raacsanayn. Marka go'aan laga gaaro, ka sii gudub.
- Kulamada ka baxsan guddiga, xubnuhu waa in ay noqdaan kuwo si cad wax u sheegaya haddii ay u hadlayaan si shakhs ahaana ama ay guddigu u aqoonsadeen in ay iyaga u hadlaan.
- Ixtiraam qaababka kala duwan ee ay leeyihiin xubnaha laga wada tirsan yahay guddiga.
- Waxaad u furfurnaataa in aad bedesho fikirkaaga iyada oo ay la xiriirto macluumaad cusub.
- Qaado masuuliyad shakhsiyeed si aad u dhiirigeliso hab-dhaqanka ixtiraamka leh ee ka dhexeeya xubnaha aad ka wada tirsan tiihin guddiga.
- Aqoonso in markasta laguu arko in aad tahay xubin ka tirsan guddiga inta lagu guda jiro hawsha, iyada oo aan loo eegayn sida aad naftaada u aragto.
- Mar kasta oo aad wax qorto, u qaado in qof kasta oo ku nool magaaladu uu garbahaaga eegayo.

- Qof kastaa ma ahan in uu su'aal kasta ka jawaabo. Mararka qaarkood waa wax CAADI AH in kaliya la joogo.
- Tilmaan sharafta iyo qiimaha ay leeyihii adeegyada ay bixiyaan Dugsiyada Dadweynaha Portland isla markaana sii wad dabeeecad wax tar leh, hal abuur leh isla markaana wax ku ool ah oo ku aadan arimaha PPS iyo dareenka qotada dheer ee mas'uuliyadda bulsho ee xubnaha guddiga ahaan.
- Aqoonso in shaqada ugu weyn ee PPS ay mar walba tahay in ay qabato waxa danta u ah dhammaan ardaydeeda oo dhan.
- Ka fogow hawlaho mijo xaabinaya kalsoonida dadweynaha.
- Ixtiraam dadka oo dhan mar walba.

Ku xad-gudubka xeerarkan anshaxa ee guddiga waxay keeni doontaa in marka la isa siiyo digniin qoraal ah waxayna ugu dambeyntii keeni kartaa in la iska saaro guddiga.